IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sann-adka 10aad Muqdisho 28 Okt. 1982 Lr 1 r 10 /bis

FAAHFAAHINTA BIL SOO BAXA — جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S.

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh 100 Somaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoriitaanka waxaa la weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda lacagta

## K O O B N I I N

### QAYBTA KOWAAD

W. M.

### QAYBTA LABAAD

### X E E R

XEER WASAARADDA GAASHAANDHIG Ga L. 10 ee 9 Agos. 1982, Magacaabid Jagada mid kasta ku feer qoran. BOG. 937

XEER WASAARADDA GAASHAANDHIG GA L. 11 ee 10 Agoos. 1982, Magacaabid Jagada mid kasta ku feer qoran. » 938

XEER WASAARADDA GANACSIGA L. 12 11 Agos. 1982, Magacaabidda Guddiyada Ruqsadaha iyo Ilaalinta Lacagta Adag ee Dalka J.D.S. » 939

Wakaaladda M. Qaranka

WASAARADDA H. GUUD, 22.9.82, Naado Dhul Jaalle Macallin Cabduraxmaan Xaaji L. 32 » 942

WASAARADDA H. GUUD, 22.9.82, Naado Dhul J/le Cabdi Cali Cabdi L. 33 » 943

WASAARADDA H. GUUD, 22.9.82, Naado Dhul J. Haashim Abuukar Cali L. 34 » 944

WASAARADDA H. GUUD, 22.9.82, Naado Dhul J. Abuukar Cumar Cismaan L.35 » 945

WASAARADDA H. GUUD, 15.9.82, Naado Dhul J/le Cali Sheekh Xaydar L. 36 » 946

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 2.10.82, Lumid Buug Kayd L. 13368 ku qoran Cabdikaynaan Cumar L. 528 » 947

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 24.10.82, Lumid J. War. L. 438500 ku qoran Maxamed Xaashi Iidle L. 529 » 948

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 24.10.82, Lumid J. War. L. 438489 ku qoran Maxamed Xaashi Iidle L. 530 » 949

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 25.10.82, Lumid J. War. L. 439898 ku qoran Cabdirashiid Cismaan Maxamed L. 531 » 950

## QAYBTA LABAAD
## XEER

### XEER WASAARADDA GAASHAANDHIG-

GA L. 10 ee 9 Agos. 1982, Magacaabid caabid Jagada mid kasta ku feer qoran.

REPUBBLICA DEMOCRATICA SOMALA

WASIIRKA WASAARADDA GAASHAANDHIGGA

MARKUU ARKAY: Inay lagama maarmaan ahay in Maxkamadaha C. Q. Sida loo magacaabo Kaaliye yaal Sharciyeysan.

MARKUU TIXGELIYEY: Soo jeedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Ciidamada Qalabka sida.

MARKUU ARKAY: Qod. 1aad Xub. 5aad ee Nidaamka Garsoorka Ciidamada.

G O' A A N

Qod. 1aad.

Saraakiisha hoos ku qoran waxaa loo magacaabay Jagada mid kasta ku feer qoran:—

1. L Xiddigle Cabdi Maxamed Barre
— Kaaliyaha Maxkamadda C.Q.S.

2. L Xiddigle Cabdullaahi Ibraahim Cilmi
— Kaaliyaha Maxkamadda C.Q.S.

Qod. 2aad.

Go'aankani wuxuu dhaqan gelayaa markii uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, waxaana lagu soo Faafinayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda:

Muqdisho, 9.8.1982

WASIIRKA WASAARADDA GAASHAANDHIGGA
S Guud Maxamed Cali Samantar

XEER WASAARADDA GAASHAANDHIG

GA L. 11 ee 10 Agoos. 1982, Magacaa bid Jagada mid kasa ku feer qoran.

MARKUU ARKAY: Inay lagama maan tahay in Maxkamadaha Ciidamada Qalabka sida iyo Xeerilaalinta Guud loo magacaabo Kaaliyeyaal iyo Xoghayeyaal Sharciyeysan.

MARKUU TIXGELIYEY: Soo jeedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare Ciidamada Qalabka Sida·

MARKUU ARKAY: Qod·1aad Xub. 5aad Nidaamka Garsoorka Ciidamada.

WUXUU GO'AAMIYEY

Qod. 1aad.

Saraakiisha iyo S/Xigeennada hoos ku qoran waxaa loo magacaabay Jagada mid ku feer qoran:

1— Xiddigle Maxamed Xaashi Maxamed
Xoghayeha Xeer ilaalinta Guud ee C.Q.S. Xamar.

2— S/Alifle Isaaq Xuseen Macallin
Kaaliyaha Maxkamadda C.Q.S. Xamar·

3— S/Alifle Aadan Kaahin Ciise
Kaaliyaha Maxkamadda C.Q.S. Dh. Mareeb.

4— L/Alifle Cali Aadan Maxamed
Xoghayaha Xeer. Guud C.Q.S. Dh. Mareeb.

Go'aankani wuxuu dhaqan galayaa markii uu saxiixxo Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Dhuusa Mareeb, 10 Agoosto 1982.

WASIIRKA WASAARADDA GAASHAANDHIGGA
S/Guud Maxamed Cali Samantar

XEER WASAARADDA GANACSIGA L. 12
11 Agoos. 1982 Magacaabidda Guddiya da Ruqsadaha iyo Ilaalinta Lacagta Adag eeDalka J.D.S.

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

WASAARADDA GANACSIGA

ASGOO ARKAY: Dastuurka J.D. SOOMAALIYA.

ASAGOO ARKAY: Go'aankii Golaha Wasiirrada ee ku saabsanaa dib u habeynta Dhaqaalaha.

ASAGOO ARKAY: Sharciga Lr. yahay 12 ee 26.9.1964, qodobkii 8aad.

ASAGOO ARKAY: Sharciga Lr. yahay 65 ee 12.12.1981, kuna saabsanaa dib u soo celinta awoodda Guddiyada Ruqsadaha iyo ilaalinta Lacagta Adag.

WUXŨU SOO SAARAYAA XEERKA SOO SOCDA:
Magacaabidda Guddiga Gobolka Banaadir:

Qod. 1aad.

Guddiga Ruqsadaha iyo ilaalinta Lacagta Adag ee Gobolka Banaadir wuxuu ka kooban yahay.

1. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Ganacsiga — Guddoomiye
2. Agaas. W/da Leysimada $ ilaa. L, Adag ee W, Gan, — Xoghaye
3. Agaas. Waaxda Furdadaha ee Wasaaradda Maa da — Xubin
4. Agaas. Waaxda Gash. Berriga ee Wasaa. Maa yada — Xubin
5. Agaas. Qeybta ilaalinta Sarrifka ee Bankiga Dhexe — Xubin

6. Agaas. Qeybta Xiriirka Dibedda ee Bankiga Ga ga
— Xubin

7. Taliyaha Qeybta ilaalinta Gash. & Dhaq ha C. Booliska
— Xubin

Qod. 2aad.

Marka Guddoomiyaha Guddiga kor ku xusani mnqan yahay, waxaa xilkiisa Guddoomiyenimada si ku meel gaar ah u wadaya Xoghayaha.

Qod. 3aad.

Guddiyada Ruqsadaha iyo ilaalinta Lacagta Adag ee Gobollada Waqooyi Galbeed, Togdheer, Sanaag Bari iyo J Hoose waxay ka kooban yihiin.

1. Isuduwaha Gobolka ee Wasaaradda Ganacsiga
— Guddoomiye

2. Isuduwaha Gobolka ee Wasaaradda Maaliyadda
— Xubin

3. Maamulaha Furdadda ee Gobolka ee Wasaaradda Maaliyadda
— Xubin

4. Maamulaha Laanta Gobolka ee Bankiga Dhexe
— Xubin

5. Maamulaha Laanta Gobolka ee Bankiga Gan siga
— Xubin

6. Taliyaha Kooxda ilaalinta Cash ha & Dha. C. Bol.
— Xubin

Qod. 4aad.

Xeer kasta oo ka soo horjeeda Jodobbada Xeerkan ama aan la socon karin waa la baabi'iyey.

Qod. 5aad.

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa 25ka Luulyo 1982ka, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

(Jaalle Maxamed Cumar Jaamac)
WASIIRKA WASAARADDA GANACSIGA

QAYBTA SADDEXAAD
TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALEYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Macallim Cabduraxmaan Xaaji uu u s ooqortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud maalintii taariikhdu ahayd 3.8.1982 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo yaal Degmada Marka Qaabkiisuna yahay Rettango lare (Laba Geesle) Addimihiisuna yihiin 14,30,14,30.22. 70.22.70= kuna fadhiya 324,61 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddada Laamiga ee D/Hoose Xaggeeda ka Timaado.

Koonfur Waxaa ka xiga: Guri ku Dheggan oo leh Xaajiya Faay Maye.

Galbeed Waxaa ka xiga: Guri ku Dheggan.

B a r r i Waxaa ka xiga: Waddado la maro

Qofkii daneynaaya dhulkaa wwuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maailnta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Marka 22.9.1982

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Inj. Cali Maxamuud Maxamed

L. 32

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALEYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdi Cali Cabdi uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 5.7.1982 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Baraawe Qaabkiisuna yahay Ret-tangolare Addimihiisuna yihiin 40,40,20,20= kuna fadhiya 800,00 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Dad leh

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Dad leh

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu sifiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Marka 15.9.1982

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Inj. Cali Maxamuud Maxamed

L. 33

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALEYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Haashim Abuukar Cali uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 4.7.82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Degmada Marka Qaabkiisuna yahay Laba Geesle (Rettangolare) Addimihiisuna yihiin 12,12,10,10,= kuna fadhiya 120,00 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: W. Laamiga Wajeer

Koonfur Waxaa ka xiga: Jid Weyn oo Lamaro iyo Shaneema Afrika

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Guri dhisan oo ku dheggan oo leh Sheriif Ingiriis.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu sifiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doo di karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Marka 22.9.1982

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Inj. Cali Maxamuud Maxamed

L. 34

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALEYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Abuuka Cumar Cusmaan uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 3.5.82 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Degmada Marka Qaabkiisuna yahay Laba Geesle (Rettangolare) Addimihiisuna yihiin 23,30,23,30,10.80. 10.80= kuna fadhiya 251,64 MDH,—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo Lamaro,

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Banaan iyo Xaaji Bashiir Khoslaaye.

Galbeed Waxaa ka xiga: Wakaaladda Dekadaha Soomaaliyeed ee Deg. Marka.

B a r i Waxaa ka xiga: Xaaji Bashiir Khoslaaye iyo Abbanuur Sayiddii,

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu sifiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Marka 22.9.1982

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Inj. Cali Maxamuud Maxamed

L. 35

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALEYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Sheekh Xaydar uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 3.12.81 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Degmada Shalaambood Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 60,60,27,27,= kuna fadhiya 1620.00 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDATAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Banaan

Koonfur Waxaa ka xiga: Laamiga ama Waddada Xamar Shalaambood

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Banaan

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu sifiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Marka 15.9.1982

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Inj. Cali Maxamuud Maxamed

L. 36

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 13368 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 4.200/= uu iska lahaa Cabdi Kaynaan Cumar sida ku cad warqadda lam. 002099 taariikh 20.10.82 oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad;

HADDUU ARKAY: Qod.69 sharciga lam.2 ee 9.9.65;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd lam. 13368 oo ku qoran magaca Cabdi Kaynaan Cumar ayna ku jirto lacag dhan Shs. So. 4.200/=.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka laanta Saddexaad u beddelo Cabdi Kaynaan Cumar Buugga Kaydka, ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is-hortaag laga keenin.

Muqdisho, 20.10.82

GUDDOOMIYAHA MAX. G. BENAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 528

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In J. wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 438500 lagana s oosaaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Afraad kuna qoran lacag dhan Shs. So. 50.000/= uu iska lahaa Jaalle Maxamed Xaashi Iidle sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 652 taariikh 24.10.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Afraad;

HADDUU ARKAY: Qod.69 sharciga lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J. Wareega lam. 438500 oo ku qoran Jaalle Maxamed Xaashi ayna ku jirto Shs. So. 50.000/=.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka laanta Afraad u beddelo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho 24.10.82

GUDDOOMIYAHA MAX. G. BENAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 529

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Jeegga dhumay oo lambarkiisu ahaa 438489 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Afraad kuna qoran lacag dhan Shs.So. 50.000/= uu iska lahaa Jaalle Maxamed Xaashi Iidle sida ku cad warqadda lambarkeedu ahaa 652 taariikhdeeduna ahayd 24.10.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Afraad;

HADDUU ARKAY: Qod.69 sharciga lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga W. lam. 438489 oo ku qoran Jaalle Maxamed Xaashi ayna ku jirto Shs.So. 50.000/=.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga Kaydka laanta Afraad u beddelo Jeegga wareega ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 24.10.82

GUDDOOMIYAHA MAX. G. BENAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 530

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;
HADDUU ARKAY: In J. Wareega dhumay oo lambarkiisu ahaa 439898 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Afraad kuna qoran lacag dhan Shs.So. 50.000/= uu iska lahaa Jaalle Cabdirashiid Cismaan Maxamed sida ku cad warqadda lambarkeedu ———— taariikhdeedu 25.10.82 ee Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laanta Afraad;

HADDUU ARKAY: Kod.69 sharciga lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J. Wareega lam. 439898 oo ku qoran Jaalle Cabdirashiid Cismaan Maxamed ayna ku jirto Shs.So. 50.000/=.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka laanta Afraad u beddelo Jeegga Wareega ee kor ku tilmaaman una sameyso mid la mid ah kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.10.82

GUDDOOMIYAHA MAX. G. BENAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 531